**WAR SAXAAFADEED**

# BABYLONE

BANDHIGGA BABYLONE WUXUU KEENAYAA FANNAANIIN MAAREEYA HADALKA, dahsoonida dabci ahaan luuqad kasta, faham la'aanta rasmiga ah ee khatarta ku haysa dhammaan isdhaafsiyada iyo tarjumaadaha, badnaanta aragtiyaha ee eray sido luuqad kasta. Badni, ajaanib, mararka qaar luuqadaha la illaaway waxay noqon doonaan waxa la darsayo bandhiggan kaasi oo jeclaan lahaa inuu shaaca ka qaado sifooyinka mushkiladdaleh caadigana aan ahayn ee luuqadaha. Bandhigga *Babylone* taageerayaa fannaaniinta abuura muuqaallada erayda eraydana muuqaal u abuura. Alifba'da dhuntay, erayada dhawaan dhashay ama "bandhigga bandhigyada" waxay inaga keeni hab-dhawaqa erayga ee qaldan ee micnaha isdiidan, ilaa muuqaalka kusaabsan go'aaminta luuqadaha.

Luuqaddu waa ina saamaysaa sababtoo ah waa daaqaddeena adduunka inuugu furan. Waa qaab la gudbiyo oo gudba oo kamid ah, waa guuritaan adduunka tarjuma oo sharraxa, laakiin sidoo kale khiyaameeya. Luuqadda dhaladka ah waxay si ballaadhan u abuurtaa aragtideena. Luuqadda masraxeed waxay keentaa tallaabo marka *la dhahayo* waxay tahay *la samaynayo*. Luuqadda gabaygu waa dulucda suugaanta, waa luuqad ka baarandegaysa nafteeda sida cid bilicsan. Luuqadaha asalka ah iyo ku hadalkooda iyo qoristoodu waa kucamalfallada la dhaqameeyey ee la hubiyo wixii qarsoon iyo khuraafaadka laga soo bilaabo markii la doqomeeyey.

Hadal ah ama qoran, luuqadda calaamadaha ama taas xarfaha, macmal ama dabiici, nool amadhintay, guud ama gaar ah -luuqaduhu waa badan yihiin in kastoo tiradooda iyo kala-duwanaantooda uu halis ku hayo saamaynta adduunka isku soo dhawaaday. Hase yeeshee, fahamka wadajiraa waa inuu yahaymid hadal ah, isla qaadasho ama caadi ah. Taa lidkeeda, waa inay wadaagtaa farobadnida dareenada. Inta "xuduudka adduunkaygu" (Ludwig Wittgenstein) yahay kaas luuqaddayda, inaan gaadho waxay ka dhigan tahay inaan bilaabo barashada adduunyo kale oo jiri karta. Sidoo kale waxay ka dhigan tahay bilaabista "gariirinta aragtiyadaha aasaasiga ah ee dhaqankeena, iyo ugu horrayn, ka kuu hoggaaminaya fikradda "runta" " (Roland Barthes). Maadaama aynaan u gaadhin shayada *sida ay yihiin* , miyey ku noolaanshaha luuqaddu ka dhigan tahay ku noolaanshaha adduunka si wakiilnimo ah? Ama ma waxay ka dhigan tahay riyo, in la beddelo lana abuuro sida fannaaniintu soojeediyaan?

***Fannaaniinta***
*Camille Bondon*
*Erik Bullot*
*Valery Chtak*
*Dora García*
*Valère Novarina*
*Charles Pennequin*
*Dominique Petitgand*
*Mladen Stilinović*

***Madxaf-hayaha***
*Nicolas Audureau*

———

***Babylone***
*Febraayo 04 – Maarso 25, 2017*

***Furmaya***
*Jimcaha Febraayo 03, 2017 – 07:00gd*

***Helitaanka***
*Oggolaansho bilaash ah*
*Salaasada ilaa Sabtida: 2-6gd*